

# City of Minneapolis

## **Ra'yi ka dhiibashada heshiiska gorgortanka**

Waxaanu idinku soo dhaweyneynaa in aad ra'yigiina ka dhiibataan heshiiska cusub ee ciidamada booliska.

## **Waxyaabaha la doonayo in aad ogaataan**

Magaalada Minneapolis iyo Ururka Saraakiisha Booliska waxaa u socda gorgortan ku saabsan heshiiska cusub. Ra'yo dhiibashada bulshada, talo soo jeedinta, iyo sida ay wax u arkaan waxaa lagu darayaa heshiiska cusub ee booliska lala galayo. Magaaladu waxa ay maanka ku heyneysaa arrimahan marka ay la gorgortamayaan Ururka Midowga Booliska ee Minneapolis (POFM).

## **[Wax ka baro nidaamka gorgortanka](#)**

### **Ra'yigaaga dhiibo**

Waxa aad ra'yigaaga ka dhiiban kartaa kulanka dhageysiga bulshada ama adiga oo foomkan ku buuxiya barta internetka.

### **Kulanka dhageysiga**

## **[La socio goorta iyo halka aad kaga qeyb qaadan karto](#)**

### **Foomka ra'yi dhiibashada**

Magaaladu waxa ay aad u daneeyneysaa dhageysiga waxyaabaha danta u ah deganayaasha ee lagu darayo heshiiska cusub ee booliska. Waxyaabaha aad ra'yiga ka dhiiban kartaan waxaa ka mid ah:

- La Xisaabtanka
- Qoroshada iyo shaqo ku heynta
- Cudurada dhimirka

### **Faalada aad qortaan waa mid dadweynaha oo dhan arki karaan**

Magaaladu way soo dhaweyneysaa oo dhiiri gelineysaa ra'yi dhiibashada dadweynaha. Marka aad soo gudbineysaan macluumaadka, waxaa muhim ah in aad cadeysaan qofka ra'yiga dhiibanaya iyo sida ay qofkaas saameyn ugu yeelatay. Waxaa adiga muhim kuu ah in aad ogaato in faalada aad dhiibato ee na soo gaarta dadweynaha ayaa loo bandhigayaa. Taas waxaa ka mid ah magacaaga iyo iimeylkaaga haddii aad ku qorto. Waxa aad qortaa oo kaliya macluumaadka aan dhib kaa soo gaareyn haddii dadweynuhu arko.

### **Codsashada ku helitaanka hab aad kaga qeyb qaadan karto**

Haddii aad dooneyso in lagaa caawiyo macluumaadkan, fadlan [iimeyl u soo dir 311](#), ama wac 311 ama [612-673-3000](#).

Fadlan sida aad dooneyso in aad ku hesho. Waxa ay naga caawineysaa in aan fahamno nooca teknoolajiyada ah ee aad isticmaasho.

## **Foomka ra'yi dhiibashada dadweynaha**

### **Ra'yi ka dhiibashada heshiiska gorgortanka ciidanka booliska**

Soo gudbi ra'yi dhiibashadaada ku aadan heshiiska cusub ee ciidanka booliska.

\* Faalada aad dhiibato ee na soo gaarta dadweynaha ayaa loo bandhigayaa.. Taas waxaa ka mid ah magacaaga iyo iimeylkaaga haddii aad ku qorto. Waxa aad qortaa oo kaliya macluumaadka aan dhib kaa soo gaareyn haddii dadweynuhu arko.

Magac

Degmada

### **La Xisaabtanka**

Maagakada iyo Ururku waxa ay doonayaan in ay xaqiijiyaan in ciidanka boolisku noqdaan kuwo si hufan oo ixtiraam leh u guta hawshooda. Taasi waxa ay keenaysaa kalsooni dhex marta deganayaasha iyo saraakiisha u xilsaaran ilaalinta amaanka. Waxa aanu isku raacsanahay in la xisaabtanka khaladaadka booliska yahay qodob aad dareen looga qabo. Shaqaalaha oo dhan waxa ay mudan yihiin in nidaamku ciqaabtu noqdo mid joogto ah oo cadaalad ku dhisan. Dhamaan heshiisyada saraakiisha booliska ee Minnesota waxa uu waajib ka dhigayaa in ay saraakiishu helaan nidaam ay racfaan kaga qaadan karaan ciqaabta la mariyo. Magaaladu sharciyada ciqaabta way ka reebtay heshiiska. Taasi waxa ay magaalada u ogolaaneysaa in ay wax ka bedeli karto sharciga.

Waa maxay talaabooyinka ay magaaldu qaadi karto si loo horumariyo la xisaabtanka?

### **Qorashada iyo shaqo ku heynta**

Ciidanka boolisku waxa ay leeyihiin xirfad gaar ah oo baahi badan loo qabo gobolka iyo qaranka oo dhan. Magaaladu waxa ay dooneysaa in ay qoroto dad maanka ku haya bulshada oo ka soo baxa shuruudaha u degsan u qorshada booliska. Shuruudaha ku xiran ka mid noqoshada booliska Minneapolis waxaa ka mid ah tababar heer gobol ah iyo shuruudaha qorshada. Shahaado kuliyadeed Ciidanka Nabadgelyada ah ayaa ka mid ah shuruudaha. Ka soo bixitaanka shuruudahaas waa mid aad tartan loogu galo oo in yar ay ka soo baxdo. Magaaladu waa in ay xooga saartaa qorshada iyo shaqo ku heynta Saraakiisha Booliska.

Sidee ayaa dadka loo qoraa in ay ku biiraan ciidanka nabadgelyada? Sidee ayaan shaqada loogu hayaa saraakiisha iminka ka shaqeeya?

### **Ra'yi dhiibashada la xiriirta cudurada dhimirka**

Ilaalinta amaanka waa xirfad aad u adag. Ciidanka waxaa soo mara xaalado aad u adag mararka qaarna argagax leh. Maagaalada iyo Ururku waxa ay doonayaan in ay xaqiijiyaan in ciidanka boolisku noqdaan kuwo ka badqaba cudurada dhimirka. Tani waxa ay sabab u noqoneysaa adeeg wanaagsan oo deganayaasha iyo ganacsiga magaaladu helaan. Magaalada iyo Ururka waxa ay ka wada shaqeynayaan sidii lagu horumarin lahaa caafimaadka dhimirka ee mustaqbalka.

Waa maxay macaashka adeegga cudurada dhimirka ama tababarada aad is leedahay waa in ay Magaaladu u fidisaa kuwa mas'uulka ka ah nabadgelyada iyo amaanka dadweynaha.

### **Faalo dheeraad ah**

Ma jiraan wax faalo oo aad ku dareyso?

Halka ku lifaaq qoraal aad diyaarsatay.